Property of
ODE Archive Library
2005 ODE 028
Catalog no.
Gina L. Steward
Scanned by (signature)
11.10.2005
Date

Ohio Department of Education
25 South Front Street
Columbus, Ohio 43215-4183
1-(877)-OHIOEDU

Wasaaradda Waxbarashada ee Ohio (Ohio Department of Education) ma sameyso takooris ku saleysan sinjiga, midabka, asal waddan, lab iyo dheddig, diin, da' ama naafo xagga shaqo-bixinta ama adeegyada.

www.OhioAcademicStandards.com

Quantity: 1,000 Unit cost: $1.403 Publication date: 09/05

Tilmaan-bixiyaha Halbeeg-yada ee Qoysaska

Akhriska
Qoraalka
Xisaabta
Saynis
Culuunta Bulshada

Waxa Laga Filayo Fasalka **2**

Ohio Department of Education

Halbeegyo imminka la helaa,
waa aqoon nolosha oo dhan jiri doonta.

Gacaliye Qoys

Waxbarashada Ohio waxa ku socda isbeddel. Isbeddelku waxa uu ilmahaaga ka gargaari doonaa inuu ku guuleysto dugsiga. Waxa kale oo si ka sii fiican sidii hore ilmahaaga loogu diyaarin doonaa inuu ku guuleysto jaamacadda ama shaqada marka uu ka qalinjabiyo dugsiga sare.

Isbeddelkan waxa sal u ah halbeegyada nuxurka waxbarasho ***(academic content standards)*** ee cusub, kuwaaso qeexaya waxa la rabo in ilmahaagu yaqaano awoodi karana heer iyo fasal kasta. Waxa imminka jira halbeegyo cusub oo ah farsamada Afka Ingiriisiga ah (akhriska iyo qoraalka), sayniska, xisaabta, iyo culuunta bulshada.

Halbeegyadan cusubi waxay macalimiinta u oggalaanayaan inay ogaadaan waxa laga filayo inay dhigaan isla markaana waxa ardayda laga rabo inay bartaan. Halbeegyadu waxa kale oo ay bareyaasha ka gargaaraan inay gartaan oo cabbiraan waxa la rabo in ardaydu yaqaanaan oo sameyn karaan.

Qayb ka tirsan qaybtan waxa ku jiri doona imtixaano guuleysi si go'aan looga gaadho sida uu ilmahaagu u sameynayo horumar uu ku gaadhayo halbeegyadaa cusub. Imtixaanadaasi waxay beddeli doonaan Imtixaanka Xariifsanaanta ee Ohio (Ohio Proficiency Tests) ee imminka jira.

Warka ku yaalla tilmaan-bixiyahan waxa uu ku siin doonaa tusaale ama muunad ku saabsan qaar ka mid ah waxyaabaha ilmahaaga laga rabo inuu yaqaano awoodi karana inuu sameeyo xagga akhriska, qoraalka, xisaabta, sayniska iyo culuunta bulshada ee loogu talaggalay fasalka labaad. Waxa kale oo tilmaan-bixiyaha ku yaala mas'alooyin ku-tababarasho oo faa'iido leh, talooyin iyo wax-qabad aad la sameyn kartid ilmahaaga si looga gargaaro inuu ku guuleysto gaadhista halbeegyada cusub.

*Waxa muhiim ah in lala socdo in tilmaan-bixiyahani **aanu** ahayn xidhmada halbeegyada oo dhameystiran; balse waxa warkan loo qorsheeyay inuu iftiimiyo tiro ah farsamooyin la soo doortay oo la rabo in ilmahaagu yaqaano isla markaana awoodi karo inuu sameeyo inta uu ku jiro dugsiga xanaanada.* Dukumentiyada halbeegyada ee rasmiga ah, oo loo qorsheeyay isticmaalka macallimiinta, waxay marmarka qaarkood le'eg yihiin dhawr boqol oo bog. Buuggan yar waxa loo soo yareeyay si adiga fududeyn laguugu sameeyo.

Si aad u aragtid xidhmada halbeegyada oo dhan, booqo rugta internetka ee Wasaaradda Waxbarashada ee Ohio oo ah **www.ohioacademicstandards.com.**

Waxa aan si dhab kaaga mahadcelinayaa wakhtigaaga, xiisaha iyo tabarta aad galinaysid waxbarashada ilmahaga. Waxa aan rajeynayaa in tilmaan-bixiyahani ka mid noqdo qalabka badan ee aad isticmaali doontid si aad ilmahaaga uga gargaartid gaadhista halbeegyadaa cusub iyo guul uu ka soo hooyo gudaha iyo dibadda fasalka.

Si gacalnimo leh,

Susan Tave Zelman

Susan Tave Zelman
Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha

Talooyin iyo Wax-qabad

- Wada daawada warka telefishanka wada-jir. Oggolow in dhacdooyinka warka lagu sheegay ay sheeko ka bilaabanto. U jeedi fiirada ilmahaaga madax la doortay oo dhawr ah iyo shaqooyinka ay qabtaan.
- Waxa aad daawan kartaa barnaamijyo ku saabsan taariikhda dad caan ahaa. Taariikh nololeedka dad dhab ah ayaa ah hab wacan oo ilmahaagu ku baran karo taariikhda.
- Isticmaal sawirro qoyska ah si aad u sameysid taxane wakhti oo dhacdooyinka si nidaam ah isugu xijinaya.
- Weydii waxa ay saynisyahannada, dab-damiska, makaanigyada, duuliyeyaasha, qareennada iyo beeralaydu qabtaan. Isbedbedala iyada oo hadba qof ka fikirayo shaqooyin kale.
- Akhri sheekooyin ku saabsan qaybaha kale ee adduunka. U soo jeedi fiirada ilmaha shaqooyinka ay dadku qabanayaan.
- Ardayda fasalka labaad waxay bartaan goloobka. Weydii ilmahaaga inuu garto qaaradaha – Aasiya, Afrika, Koonfur Ameerika, Waqooyiga Ameerika, Yurub, Oostareeliya iyo Antaartika. Ciyaar ka samee iddinka oo helaya qaaradaha iyo badaha.
- Marka ilmahaagu su'aalo ku weydiiyo, ka gargaar inuu ku fikiro siyaabo kale oo jawaab lagu helo sida isticmaalidda kombiyuutarka iyo buugaag ama weydiiyo qof wax ka yaqaana mawduuc gaar ah.
- Marka aad kaxeysid baabuurka, ilmahaaga ka gargaar inuu garto faraqa u dhexeeya siyaabaha dhulka loogu isticmaalo miyiga, sheedaha magaalada iyo magaalada. Ciyaar samee aad ku tirinaysid guryaha xoolaha, kaalimaha shidaalka ama guryaha ku yaala meelo kala duwan. Ka hadal sidii dhulka sida uu imminka yahay uga duwanaa ka hor intaan dad badani soo degin.
- Ka hadal shaqadaada iyo kuwa saaxiibada isla markaana tilmaan alaabta iyo adeegyada lagu soo saaro meesha aad ka shaqeysid. Ilmahaaga ka gargaar inuu fahmo in qoysaska intooda badani aanay maanta soo saarin wax kasta oo ay u baahan yihiin.

Fiiro: Qaar ka mid ah talooyinka iyo waxbaqadyada ku yaala tilmaan-bixiyaha waxa laga soo xigtay "talooyin waalidka loogu talaggalay" oo lagu soo qoray rugta internetka ee Georgetown County School District' ee South Carolina (www.gcsd.k12.sc.us) lagana helay qoraalo uu soo saaray Chelsea House Publishers, 2080 Cabot Blvd. West, Ste. 201, Langhorne, PA 19047-1813; 1-800-848-BOOK. Ilahaa waxa la isticmaalay iyadoo oggalaansho laga haysto qoreyaasha kuwaasoo aanu mahad u celinayo.

Waxa kale oo Wasaaraddu ay jeceshay inay u mahadceliso xarunta Ohio Muskingum Valley Educational Service Center oo Wasaaradda ka gargaartay daabacaaddan.

a) Sameynta iyo hirgalinta xeerarka;
b) Bixinta horseed;
c) Bixinta adeegyo;
d) Xalinta khilaafka.

- Sharax sababta goobta shaqadu u leedahay xeerar.
- Sheeg waxa laga yaabo inuu dhaco (cawaaqib) marka la raaco ama jabiyo xeerarka gudaha goobo kala duwan.

Xuquuqda iyo Waajibaadka Muwaadinnimada

Taa macnaheedu waa: *Diyaarinta noqoshada muwaadiniin firfircoon.*

- Tus farsamooyin sharaxna faa'iidooyinka laga helo iskaashi koox dhexdeed oo ay ku jirto maamulista khilaafka (dhibaatooyinka) oo si nabad leh loo sameeyo iyo muujinta ixtiraam iyo xishmad dadka kale loo muujiyo.
- Muuji astaamaha muwaadinnimada oo ay ku jiraan run, isku-kalsooni, ixtiraamka xuquuqda dadka kale, samir iyo waddaninimo.

Farsamooyinka Culuunta Bulshada iyo Hababka

Taa macnaheedu waa: *Ururinta warka, habeyntiisa iyo isticmaalkiisa si go'aamo loo gaadho.*

- Garo ilaha la isticmaalo si war loo soo ururiyo sida dadka (macallin, waalid, shaqaale laybareeri), waxa daabacan (buugaagta) iyo ilaha elegtaroonigga ah (rugaha internetka).
- Awood inaad saadaalisid dhacdada ku xigta xigsiisan (waxyaabo taxane ah).
- Sheeg faraqa u dhexeeya run iyo khiyaali.

Fiiri fahamkaaga: ***Run iyo Khiyaali***

Carruurtu waxay bilaabaan inay fahmaan faraqa u dhexeeya waxa run ah iyo waxa aan ahayn. Kartuunada waxa laga sooci karaa warka dhacdooyinka ku saabsan. Sheeko baraleydu way ku duwan tahay buugaagta ku saabsan dad run ah.

- Isticmaal farsamooyin lagu xaliyo dhibaatooyin/go'aan lagu gaadho si loo garto dhibaato isla markaana soo ururi war adiga oo kaligaa shaqeynaya iyo adiga oo koox la shaqeynaya.

Farsamooyinka Afka

Garasho Cod Xaraf, Garasho Erey iyo Xariifnimada

Taa macnaheedu waa: *Adiga oo awoodi kara inaad si wacan wax u akhridid adiga oo sheegaya codka ereyada, ku garanaya aragga isla markaana si fudud oo xariifnimo leh sare ugu dhawaaqaya*

- Garo ereyada isku cod ku dhamaada.
- Arag ku akhri ereyada leh in ka badan hal qurub ama qayb.
- Isku dar codadka (tusaale ahaan, **truck**, **smile**) si aad u garatid ereyada aanad aqoonin.
- Garo ereyada kuwa leh shaqal dhaadheer ama shaqal gaagaaban.

Fiiri fahamkaaga: ***Shaqalada Dhaadeer iyo Shaqalada Gaagaaban***

Ereyada leh *shaqal dheer* waxa ka mid ah ereyada **baabuur**, **tuubo**, **qaniinyo**.
Ereyada leh *shaqal gaaban* waxa ku mid ah ereyada **bad**, **fur**, **bed**, **sin**.

- Kuwaa u akhri si fudud xagga codka, odhaahda iyo wakhtiga.

Barashada Ereyada

Taa macnaheedu waa: *Inaad awoodi kartid inaad garatid tilmaamaha marka aad akhriyaysid, weydiin kartid su'aalo, dhageysan kartid lana sheekeysan kartid dadka waaweyn iyo facaaga.*

- Garo waxa ay yihiin isku-macne iyo isku-lid macne.

Fiiri fahamkaaga: ***Isku-macne iyo Isku-lid Macne***

Isku-macne: Ereyada leh macne isku mid ah sida *pretty* and *beautiful*, ama *large* iyo *big*.

Isku-lid Macne: Ereyada leh macne iska soo horjeeda sida *quiet* iyo *loud*, ama *hot* iyo *cold*.

- Garo macnaha erey isku-dar ah (tusaale ahaan, lunchroom, baseball) sharaxna sida labada erey xidhiidh u leeyihiin.
- Garo macnaha hordhigga ereyada (tusaale ahaan, **un**leash, **re**pay) iyo gadaaldhigga (tusaale ahaan, fast**est**, wish**ful**).
- Isticmaal xididka ereyada (tusaale ahaan, **smile**) iyo dhamaadkeeda (tusaale ahaan, smil**ed** or smil**es**) si aad u garatid macnaha erey.
- Akhri ereyada isku-qormada ah. Isku-qormo waa ereyo isku higgaad ah, laakiin leh macne iyo dhawaaq kala duwan. Tusaale ahaan, "She will ***tear*** the cloth" iyo "He cried a ***tear***."

Habka Akhriska – Fikradaha Wixii Daabacan, Tabaha Fahamka iyo Tabaha Is-ilaalinta

Taa macnaheedu waa: *Akhriska ayay ardaydu ka fahmi doonaan fikradaha aasaasiga ah iyo macnaha noocyada kala duwan ee alaabta daabacan.*

- Ulajeedo u samee akhriska (tusaale ahaan, si war loo helo. Loo raaco fariimo, si maaweelo loo sameeyo).
- Garo fikradda muhiimka ah ee ku jirta sheeko kuna dar faahfaahinta taageeraysa fikradda muhiimka ah.
- Ka jawaab su'aalaha **tooska** ah (weydiin toos ah), **dheegid** (aan toos ahayn oo u baahan war dheerad ah) iyo su'aal **qiimeyn ah** (oo ka rabta akhristaha inuu go'aan gaadho ku saleysan ra'yigiisa) si loo muujiyo fahamka wixii la akhriyay ama la daawaday.

Dabaqidda Akhriska – Qoraal ah War, Farsamo iyo Ka-dhaadhicin

Taa macnaheedu waa: *Akhrinta, fahmidda, sharaxaadda iyo faaqidaadda noocyo kala duwan oo ah qoraalo sida majaladaha, maqaalada, khariidadaha iyo rugaha internetka.*

- Dhacdooyinka isugu xeji si nidaam leh adiga oo tirin ku sameynaya..
- Qor su'aalaha qoraalka ee ku saabsan 'ayaa sameeyay', 'maxaa dhacay,' 'goorma ayaa wax dhacay,' 'halkee wax ka dhaceen,' 'haddii' iyo 'sidee'.
- Garo warka ku yaala shaxanada, jaantusyada, garaafyada iyo khariidadaha.

- Isbar-bardhig sida dhulka loogu isticmaalo magaalo, agagaarka magaalada, iyo meelaha miyiga ah.

Fiiri fahamkaaga: ***Sida Dhulka Loogu Isticmaalo Aagga Kala Duwan***

Dhulka ku yaala meel miyi ah waxa laga yaabaa in loo isticmaalo beer, halka dhulka ku yaala meel magaalo ah uu lahaan karo ganacsiyo badan. Dadka magaaladu waxay badanaa ku nool yihiin guryo isku-dhagan (duplex) ama abaarmano, halka dadka miyiga iyo agagaarka magaaladu ay badanaa ku nool yihiin guryo qoys oo kali taagan.

- Sharax siyaabaha dadku ay u beddeleen degaanka maadiga ah sida iyaga oo dhisaya wadooyin oo dhirta jaraya si ay magaalooyin u sameeyaan.

Dhaqaale

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda sida go'aan loo gaadho gudaha habkeena dhaqaale.*

- Sharax sida khayraadka loogu isticmaali karo siyaabo kala duwan (tusaale ahaan, cabbir galley ah ayaa la siin karaa lo'da, waxa loo isticmaali karaa in macaaneeye laga sameeyo ama in shidaal laga sameeyo).
- Sharax sida isku mar dadku ay u yihiin iibiyeyaal iyo iibsadeyaal badeeco iyo adeegyo.
- Fahan in dadka badidiisu ay ka shaqeeyaan shaqooyin ay ku sameeyaan badeecad ama adeegyo yar oo gaar ah.
- Sharax sida dadka ku nool meelo kala duwan oo adduunka ah ay u soo saaraan nolol maalmeedkooda.

Dawlad

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda sababta dawladdu lagama-maarmaan u tahay iyo sida ay u shaqeyso.*

- Tilmaan madaxda ay ka mid yihiin duqa/duqda magaalada, maamulaha gobolka iyo madaxweynaha, sharaxna in dadku doortay.
- Sharax sababta hab dawladeed uu nidaam ugu yeelo dugsi ama beel, iyo sababta dawlad loogu baahan yahay, oo ay ku jirto:

b) Sahamiyeaal, ikhtiraaceyaal, iyo saynisyahanno sida George Washington Carver, Thomas Edison, Charles Drew, Rachel Carson iyo Neil Armstrong.

Dadka iyo Bulshooyinka

Taa macnaheedu waa: *Garashada isu-ekaanta iyo faraqa u dhexeeya caadooyinka dadyowga kala duwan.*

- Sharax caadooyinka iyo dhaqamada dadyowga ku nool waddamada ama qaaradaha kala duwan.
- Sharax sida biirinta ka timi kooxo dad ah oo kala duwan ay qaab ugu sameysay dhaxalkeena qaran.

Fiiri fahamkaaga: ***Biirinta Qaab u Sameysay Dhaxalka Maraykanka.***

Nolol maalmeedka dadka Maraykanka waxa qaab u sameeyay saameyn ka timi dunida oo dhan. Ereyo badan oo ka yimi afaf kale ayaa hadalka ka mid ah. Magacyo meeleedka ay ka mid yihiin Ohio ama Lake Erie waxa ay ka yimaadeen ereyo ay lahaayeen Hindida Ameerika.

Cunto ka timi waddamo badan ayaa laga helaa makhaayadaha iyo dukaannada. Ardaydu waxay bilaabaan barashada xidhiidhka dadyowga iyaga oo ku jira fasalada hore e bilowga ah.

- Sharax biirinta ay Maraykanka iyo dhaxalkiisa ku kordhiyeen dadka muhiimka ah sida ikhtiraaceyaal, saynisyahanno, farshaxanno, injineerro, sahamiyelaal iyo madax siyaasadeed.

Joqoraafi

Taa macnaheedu waa: *Garashada meesha goobuhu ku yaalaan, sida goobuhu isugu xidhan yihiin iyo sida hawlaha bini'aadanku u saameeyaan.*

- Samee khariidad oo ku jiro magac iyo fure khariidadeed oo sharxaya waxa astaamuhu u taagan yihiin.
- Soo saar meelaha ah qaab dhuleed (tusaale ahaan, dhul taag ah, jasiirado, kuro, buuro ama dooxooyin) iyo meelaha biyaha leh (tusaale ahaan, illiilad, war, haro, bad) ee ku yaala sawirro, khariidad iyo moodeel ah 3-cabbirle.

Dabaqidda Akhriska – Qoraal Suugaaneed

Taa macnaheedu waa: *Habeynta iyo ka-tarjumidda natiijooyinka iyada oo la isticmaalayo ururin xog si looga jawaabo su'aalaha oo loo xalliyo mas'alooyinka, loo muujiyo xidhiidhada loona saadaaliyo noocyada kala duwan ee suugaanta (tusaale ahaan, sheeko khuraafiga, sheekooyinka, sheekooyinka gaaggaaban).*

- Sheeg isu-ekaanta iyo faraqa u dhexeeya nuqulo kala duwan oo ah isla sheeko.
- Sharax jileyaasha iyo goobta (wakhti, goobta).
- Dib uga sheekee hab-dhiska sheeko (nidaamka dhacdooyinku isugu xigaan).
- Garo faraqa u dhexeeya sheeko, gabay, ciyaar, sheeko baraley iyo sheeko xayawaan.



Hababka Qoraalada

Taa macnaheedu waa: *Isticmaal tallaabooyinka sii-qoridda, qoraalka koobaad, naqtiinka iyo tifaftiridda si loo daabaco noocyada kala duwan ee qoraalada.*

- Abuur fikrad sal u ah qoraalka.
- Habee qoraal leh bilaw, dhex iyo dhamaad.
- Isticmaal hab-dhis weedho oo sameynaya hadal sheegid ah, hadal su'aal ah isla markaana muuji shucuur iyo dareen (yaab).

Fiiri fahamkaaga: ***Hadallo Sheegid, Su'aalid iyo Yaabid ah***

Sheegid: Shaqadii buu tagay.
Su'aalid: Ma jirran tahay?
Yaabid: Iska jir!

- Isticmaal ilaha ay ka mid yihiin qaamuska bilawga si aad u dooratid ereyga habboon.
- Dib u akhri qoraalka si aad u hagaajisid naxwaha, higgaadda, calaamadaha qoraalka iyo xaraf-weynaynta.

Dabiqidda Qoraalka

Taa macnaheedu waa: *Barashada, isticmaalka iyo doorashada ereyada ku habboon noocyada kala duwan ee qoraalka, min waraaqaha ilaa warbixinnada sayniska, ee loogu talaggalay akhristeyaal kala duwan.*

- Qor sheekooyin bixinaya fariimo cad oo leh faahfaahin, nidaam leh oo isticmaalaya hadal leh muujin dareen.
- Qor jawaabo aad kaga jawaabaysid sheekooyin adiga oo qoraallada bar-bardhigaya dad ama dhacdooyin.
- Qor waraaqo martiqaad oo ay ku jirto dhamaan qaybaha waraaq: taariikh, salaan habboon, nuxur, dhamaad iyo saxeex.

- Qor farriimo, joornaallo, xusuus iyo gabayo.

Xeerka Qoraalka

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda iyo dabiqida calaamadaha qoraalka, naxwaha iyo xeerarka higgaadda.*

- Si nadiif ah wax u qor, adiga oo si sax ah bannaanno ugu kala sameynaya ereyada, weedhaha iyo xuruufta.
- Ereyada inta badan la isticmaalo si sax ah u higgaadi.
- Bilaw inaad saansaamaha higgaadda iyo xeerarka si sax ah u isticmaashid (tusaale ahaan, ka tegidda e-da aamusan inta aadan ereygs ku darin — ing).
- Si sax ah u isticmaal calaamadaha joogsiga, su'aasha iyo yaabka.
- Si sax ah u isticmaal xaraf-weynaynta (tusaale ahaan, xaraf weyn ka bilaw magacyada gaarka ah, ereyga ugu horeeya weedha, bilaha iyo maalmaha toddobaadka).
- Si sax ah u isticmaal magacyada, falalka, iyo tilmaameyaasha.

Culuunta Bulshada

Muhimad: Dadka oo Wada Shaqeynaya

Taariikh

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda saansaanta dhacdooyinka dhacay wakhti hore*

- Cabbir wakhtiga oo ah maalmo, toddobaadyo, bilo iyo sannado.
- Dhacdooyinka oo nidaam isugu xiga ku qor xariiq wakhtiyeed.
- Isticmaal alaab ka timi wakhti hore sida sawirro, sheeko nololeedyo, khariidado, qormo taxane ah iyo sheekooyinka hiddaha iyo dhaqanka si aad uga jawaabtid su'aalaha ku saabsan nolol maalmeedka wakhtigii hore.
- Garo shaqada dadku sameyn jiray wakhtigii hore si ay nolol maalmeedkooda u soo saaraan isla markaana sharax sida shaqooyinkii la qaban jiray wakhtigii hore ay ugu eg yihiin iyo/ama uga duwan yihiin shaqooyinka maanta la qabto.

Fiiri fahamkaaga: ***Shaqooyinka Wakhtigii Hore iyo Shaqooyinka Maanta***

Hal hab oo wakhtigii hore nolol maalmeedka lagu soo saari jiray waxa uu ahaa in la noqdo tumaal. Sidee shaqada tumaalku ugu eeg tahay shaqada makaanigga ee maanta?

- Sharax tusaalooyin muujinaya sida sayniska iyo farsamadu u beddeleen nolosha dadka isla markaana isbar-bardhig:
  a) Qaababka isgaadhsiinta min wakhtigii hore ilaa maanta (tusaale ahaan, waraaqo, teleefono, iimayl);
  b) Qaababka gaadiidka min wakhtigii hore ilaa maanta (tusaale ahaan, gaadhi-faras, tareeno, baabuur, diyaarado).
- Fahan sida falalka iyo dabaceedda qofku ay isbeddel ugu sameyn karaan nolosha dadka kale. Waa inaad awoodid inaad sharaxdid muhimadda:
  a) Madaxda bulsho iyo siyaasadeed ee Maraykanka sida George Washington, Thomas Jefferson, Tecumseh, Harriet Tubman, Abraham Lincoln, Soujourner Truth, Susan B. Anthony iyo Dr. Martin Luther King, Jr. [wiilkii].;

Talooyin iyo Wax-qabad

- Ilmahaagu ha garto qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha wakhtiyo kala duwan oo ah maalinta. U wada fiirsada dayaxa mudo ah dhawr toddobaad. Eeg shaxanka dayaxa ee ku yaala qaybta cimilada ee wargeyskaaga maalinlaha ah ama kaalindhar.
- Qor isbeddelada ku dhaca cimilada sannad gudihii una fiirso isbeddelada ku dhaca xilliyada. Garo nooca waxa di'i doona iyo dhacdooyinka la filayo wakhtiyo kala duwan oo sannadka ah iyo sababta. Tusaale ahaan, gugu waxa uu keenaa roob badan iyo duufaano waxana dhulku diyaar u noqdaa beerista.
- Marka aad fadhidid miiska cuntada, ka hadal shuruudaha aasaasiga u ah nolosha kana hadal sida nooleyaasha kale uga soo baxaan shuruudahaa.
- Qalab muusig ka samee alaabooyin kala duwan oo laga helo guriga dhexdiisa iyo dibaddiisa. Samee sanqadh kala nooc ah isla markaana hagaajin ku samee sanqadh una fiirso waxa keenaya isbeddelka.
- Ilmahaaga ka gargaar inuu hormariyo afka iyo u-fiirsashada adiga oo isticmaalaya xayawaan si looga hadlo waxa ay wadaagaan iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin. Tusaale ahaan, shimbiraha waxa loo isticmaali karaa isbar-bardhigga cabbirka, noocyada baalasha, degaanka iyo ilaha cuntada.

Fiiri fahamkaaga: ***Magacyada, Falalka iyo Tilmaameyaasha***

Magac waa qof, meel ama wax, **fal** waa erey hawl sheegaya, **tilmaame** waa erey wax sharaxaya.

Sahra waxa ay cuntay buskud weyn.
Sahra waa magac, *cuntay* waa fal isla markaana weyn waa tilmaame.

- Isticmaal magac-u-yaalka gaarka ah (ereyada beddela magacyada waxyaabaha ama dadka).

Fiiri fahamkaaga: ***Magac-u-yaalka Gaarka ah***

Halkii aad ka odhan lahayd:
""Hey, I hear you met Bob yesterday. How is **Bob**?"

Dheh:
"Hey, I hear you met Bob yesterday. How is **he**?"

Baadhis

Taa macnaheedu waa: *Garashada sida loo soo ururiyo war ku saabsan dhamaan mawduucyada kala duwan iyada oo la isticmaalayo qalab ah noocyo kala duwan (tusaale ahaan, buugaagta, kombiyuutarada, majaladaha) iyo in la soo gudbiyo wixii la helay.*

- Abuur su'aalo loogu talaggalay in lagu baadho mawduuc ama wax la xiiseynayo.
- Isticmaal tabaha baadhista si aad war uga soo ururisid goobo kala duwan sida laybareeriyada, fasalada ama ilaha beesha.
- Garo warka muhiimka ah isla markaana ka qor xusuus gaaban.
- Adiga oo gargaar ka helaya macallinka, warka muhiimka ah u kala sooc kooxo.

Isgaadhsiin: Af iyo Arag

Taa macnaheedu waa: *Sameynta bandhigyo ku saabsan mawduucyo kala duwan oo loo soo bandhigo daawadeyaal kala duwan.*

- Isticmaal farsamooyinka dhageysiga ee firfircoon adiga oo sameynaya il-kala-socod ama su'aalo weydiinaya.

- Garo fikrada muhiimka ah ee ku jirta bandhig.
- Raac farriimo leh laba ama saddex talaabo.
- Samee bandhigyo:
  a) Fikrado/dhacdooyin u soo bandhigaya si nidaam leh oo leh hadaf cad;
  b) Muujinaya in la fahmay mawduuca;
  c) Ku soo dar hordhac cad, nuxur iyo gunaanad;
  d) Isticmaal muuqaalo;
  e) Magacaw ilaha.
- Samee bandhig fudud sida tirinta gabay, tixo dhamaadka isku xuruuf ah, heeso iyo sheekooyin.

Talooyin iyo Wax-qabad

- Ilmahaaga ka gargaar inuu dhageysto faahfaahinta sheekooyinka: *ayaa sameeyay, maxaa dhacay, goorma, halkee* iyo *sababta*. Ilmahaaga u akhri wargeys oo weydii su'aalo ku saabsan faahfaahinta. Ayay sheekadu ku saabsanayd? Maxaa dhacay?
- Dheh erey leh shaqal gaaban sida "cat." Weydii ilmahaaga inuu garto shaqalka uu maqlay ee ku jira ereyga. Ka dib, weydii inuu yidhaahdo erey kale oo isla shaqalkaasi ku jiro. (Shaqalada gaagaaban: *a* sida *apple*, *e* sida *egg*, *i* sida *itch*, *o* sida *ox*, *u* sida *up*.)
- Magac-u-yaalku waa erey gala meesha magaca. Magac-u-yaalada qaarkood waa *isaga, iyada, annaga, uu, ay, la,* iyo *adiga*. Ilmahaaga u akhri sheeko. Weydii inuu soo saaro magac-u-yaallada ku jira sheekada waana inuu kuu sheego magaca uu magac-u-yaalku beddelayo.
- Marka aad ilmahaaga buug la akhriyaysid, weydii inuu ku tuso magaca buugga, magaca qoraaga iyo tusmada qoraalka.
- Ciyaara ciyaar la raadinayo erey isku-dar ah. Ilmahaaga weydii inuu goobo ama wareeg galiyo 10 erey oo ku qoran bog ama baal wargeys.

iskuna day inaad bixisid jawaabo caqli-gal ah marka aad dadka kale su'aalo ku weydiiyaan.

- Sahami su'aalaha ah "sidee" ee ay ka yimi ardayda kale.
- Si buuxda u raac hababka amaanka marka aad sameynaysid tijaabo saynis.
- Isticmaal marag-kac (xaqiijin) marka aad sharaxaad ka bixinaysid baadhitaanada saynis (tusaale ahaan, Maxaa aad u maleynaysaa? Sidee baad ku taqaanaa?).
- Fahan in sharaxaad la sameeyo marka jawaab laga bixinayo fiiro ama dhacdo.
- Isticmaal qalabka saxda ah si aad u ururisid xog (tusaale ahaan, saacado, weyneysooyin, masdarado).
- Cabbir astaamaha walxaha adiga oo isticmaalaya qalabka ay ka mid yihiin masdarado, miisaano iyo heerkulbeegyada aan jabaynin.
- Wadaag sharaxaadda si aad dadka kale u siisid fursad ay ku weydiiyaan su'aalo, dib u fiiriyaan marag-kaca isla markaana ay sharaxaad kale ugu taliyaan.

Siyaabaha Saynis ee Wax Loo Ogaado

Taa macnaheedu waa: *Barashada sida loogu fikiro hab saynis iyo fahmidda sida dadku qaab ugu yeeleen barashada iyo ku-dhaqanka sayniska.*

- Shaax in baadhitaanada saynis ay caadi ahaan isku si ugu shaqeeyaan xaaladaha isku midka ah.
- Sharax sababta ay saynisyahanadu ay dib u fiiriyaan su'aalana uga keenaan natiijooyinka ay soo saareen saynisyahanada kale.
- Sharax siyaabo keenaya in haddii la isticmaalo jawaabta (xalka) wax laga qabanayo dhibaato ay u saameyn karto dadka kale iyo degaanka.

Fiiri fahamkaaga: ***Sida Xalka Dhibaatooyinku u Saameyn Karo Dadka Kale***

Kaymaha oo la jaro si loo sameeyo banaan laga dhiso guryaha ama mashaariixc kale ayaa tusaale u ah sida xalka dhibaato u saameyn karo dadka iyo degaanka.

- Muuji in marka saynis lagu shaqeynayo, ay faa'iido leedahay in koox ahaan loo shaqeeyo oo wixii la helo lala wadaago dadka kale.

Saynisyada Maadiga

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda hababka maadiga ah, aragtiyada iyo astaamaha walaxda, tamarta, xoogga iyo socodka.*

- Sahami sida waxyaabo kale duwani u sameyn karaan sanqadho (tusaale ahaan, duub cinjir ah, xadhko).
- Sahami oo sharax sanqadho (tusaale ahaan, sanqadh sare, hoose, khafiif ah, qaylo badan) oo ay sameeyaan alaab gariiraya.
- Baadhitaan iftiinka ku samee adiga oo isticmaalaya tooshash iyo hadh si aad aragtid sida iftiinku toos u socdo ilaa uu ku dhacayo shay.

Sayniska iyo Farsamada

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda xidiidhka ka dhexeeya sayniska iyo farsamada si loo sameeyo naqshad loona dhiso qalab si loo xaliyo dhibaatooyin.*

- Sharax in isticmaalka farsamadu ay leedahay faa'iidooyin iyo khasaare.
- Raadi sababta ay dadku wax cusub u soo saaraan ama u ikhtiraacaan si ay u haqabtiraan baahidooda.
- Saadaali (sheeg waxa dhici doona) sida sameynta ama isku dayidda wax cusubi ay u saameyn karto dadka kale iyo degaanka.
- Af ahaan (hadal), sawir ahaan ama qoraal ahaan, u soo gudbi habka la isticmaalay si wax loo sameeyo.

Raadin Saynis

Taa macnaheedu waa: *Isticmaalidda habab saynis si loo weydiiyo su'aalo, loo sameeyo baadhitaano, loo ururiyo, loo qeexo loona gudbiyo war.*

- Weydii su'aasha "Sidee baan/baynu".
- Weydii su'aasha "Sidee baad ku ogaatay" (ma aha su'aasha "waa maxay sababtu") marka ay xaaladda ku habboon yihiin

Xisaabta

Tirada, Macnaha Tirada iyo Hawlaha Xisaabaha

Taa macnaheedu waa: *Isticmaalidda macnaha tirada iyo farsamooyinka tirinta, laga bilaabo tirinta aasaasiga ah ilaa xisaab-soo-saarista lagu sameeyo qalin iyo warqad, ilaa isticmaalka da' ahaan habboon ee kaalkulaytarada iyo kombiyuutarada.*

- Isticmaal firadaha qiime goob si aad u qortid, u akhridid, isku bar-bardhigtid oo nidaam ugu yeeshid tirooyin.

Fiiri fahamkaaga: ***Isticmaalidda Fikradaha Qiime Goob***

Akhri oo qor tirooyin 3-godle ah. Tusaaale ahaan, qor ama isticmaal moodeelada boqolaal, tobeeyo iyo koobaadyo si aad u muujisid in 243 ay tahay 24 tobaneeyo iyo 3 koobaad ama ay tahay 2 boqolaad iyo 43 koobaad, iyo inaad muujisid tiro 10 ka yar 243.

- Tiri lacag oo sarif bixi adiga oo isticmaalaya lacag macdan ah iyo lacag warqad ah oo ah $1.
- Muuji jajabyo (kala badh, hal-saddexaad, hal-afraad, hal-lixaad, iyo hal-sideedaad) adiga oo isticmaalaya ereyo, tirooyin iyo qaybo ka tirsan halwax, ama xidhmo alaab ah.
- Garo oo muuji xaalado ay ku jiraan isku-dhufasho iyo qaybin sida isku-dhufasho ah isku-darid kooxo ama alaab is tiro le'eg iyo qaybin si siman wax loo qaybsanayo.

Fiiri fahamkaaga: ***Isku-dhufasho iyo Qaybin***

Isku-dhufasho:	Sharax 4 x 3, sidii ay tahay 4 sanduuq iyada oo 3 xabo oo ah nacnac ay ku jiraan sanduuq kasta.
Qaybin:	Sharax 8 ÷ 4 sidii ay tahay 8 busgud oo si siman 4 saaxiib u qaybsadeen.

- Si dhakhso ah oo sax ah u hel isku-darka iyo faraqa u dhexeeya tirooyin leh hal god (isku-darka iyo ka-jaridda aasaasiga ah).
- Isku dar oo kala jar dhufsaneyaal 10.
- Qiyaas jawaabta ay leedahay mas'alo isku-dar ama ka-jarid adiga oo isticmaalaya qiyaas xag hore iyo xag dambe.

Fiiri fahamkaaga: ***Qiyaas Xag Hore iyo Xag Dambe***

Qiyaas Xag Hore iyo Xag Dambe: Isticmaal tirooyinka madaxa ah ama kuwa leh leh qiimaha god ee ugu sareeya si aad si dhakhso ah oo fudud qiyaas u sameysid. Tusaale ahaan, isku-darka 43 + 55 waxa kuu badan yahay 90 (4 tobaneeyo + 5 tobaneeyo) isla markaana faraqa u dhexeeya 73 - 45 qiyaastii waa 30 (7 tobaneeyo - 4 tobaneeyo).

Cabbirista

Taa macnaheedu waa: *Sameynta cabbiro sax ah iyada oo la isticmaalayo qalab, ereyo iyo farsamo habboon.*

- Garo unugyada habboon ee cabbirista dhererka, mugga, miisaanka iyo wakhtiga.
- Sharax sida unugyada cabbirku ay isugu xidhan yihiin (tusaale ahaan, 12 inji = 100 sentimitir = 1 mitir).
- Samee unugyo tixraac oo loogu talaggalay cabbirka caadiga ah.

Fiiri fahamkaaga: ***Unugyada Cabbirka ee Tixraaca Caadiga ah***

Ballaca far qiyaastii waa hal sentimitir isla markaana ballaca 2 faradood waa qiyaastii 1 inji; koob weyni waxa uu qaadaa 1 koob isla markaana warqad-qabatada miisaankeedu qiyaastii waa 1 garaam.

- Sheeg wakhtiga oo ah daqiiqadda ugu dhow marka aad eegtid saacad tiro sheegaysa iyo shanta daqiiqadood ee ugu dhow marka aad eegtid saacadda wareegta.
- Isticmaal qalabka cabbirista sida masdarad si aad u sawirtid xarriijin dhererkeedu yahay 3 inji, koob wax lagu cabbiro si 2 koob oo ah bariis loogu shubo baaquli ama madiibad iyo miisaan si loo helo miisaanka bataati ama baradho oo ah garaam.

Fahanka Joomatariga iyo Banaanka

Taa macnaheedu waa: *Garashada, kala-soocidda iyo qeexidda waxyaabo leh hal, laba ama saddex cabbir, fahmidda astaamahooda iyo isticmaalidda aqoon si loo furfuro mas'alooyin.*

Fiiri fahamkaaga: ***Noocyada Degaannada***

Baduhu waxay quudiyaan kaluunka, kaymuhu waxay quudiyaan deerada isla markaana daaqu waxa uu quudiyaa lo'da.

- Sharax sababta ay nooleyaashu ugu noolaan karaan kaliya degaannada haqabtiri kara baahidooda (tusaale ahaan, kaluunku ma noolaan karo biyo la'aan).
- U fiirso wixii isu eeg iyo wixii kala duwan marka aad eegtid nooleyaal isku nooc ah oo ah dhir ama xayawaan, oo ay ku jiraan dadku (tusaale ahaan, eydu waxay leeyihiin midabyo kala duwan, caleentu waxay leeyihiin qaabab kala duwan, dadkuna waxay leeyihiin midab timo oo kala duwan).
- Sharax in cuntadu dhirta iyo xayawaanka u tahay baahi aasaasi ah (tusaale ahaan, dhirtu waxay u baahan yihiin iftiin si ay cunto u sameeyaan iyo si ay u koraan, isla markaana xayawaanku waxay cunaan dhirta iyo/ama xayawaanka kale si ay cunto u helaan) waana muhiim sababta oo ah waa il laga helo tamar.
- Sahami qaab-dhiska kala duwan ee dhirta iyo xayawaanka ee ka gargaara inay ku noolaadaan degaanno kala duwan (tusaale ahaan, sambabka, xubinta neefsashada kaluunka, caleemo iyo xidido).
- Isbar-bardhig degaannada noocyada kala duwan ee dhirta iyo xayawaanka Ohio, iyo qaar ka mid ah siyaabaha ay xayawaannadu ugu tiirsan yihiin dhirta iyo xayawaanka kale.

Fiiri fahamkaaga: ***Degaan Nololeed***

Degaan Nololeed: Degaan nololeed waa degaan uu si dabiici ah geed ama xayawaan ugu nool yahay. Tusaale ahaan, kaluunku waxa uu ku nool yahay baliyada ama badaha halka uu madax-kutigu (bear) ku nool yahay kaymaha ama duurka.

- Isbar-bardhig hawlaha xayawaanka caadiga ah ee Ohio (tusaale ahaan, dabagaale, jiibman (chipmunk), deero, ballanbaalis, shini, qudhaanjo, fiidmeer iyo rah) inta lagu jiro xilliyada kala duwan isla markaana sharax isbeddelada ku dhaca dhaqankooda iyo dahaadhka oogadooda.
- Isbar-bardhig dhirta Ohio inta lagu jiro xilliyada kala duwan adiga oo sharaxaya isbeddeladu sida arag ahaan ay u kala duwan yihiin (tusaale ahaan, caleemuhu waxay beddelaan midabkooda dayrtii).

Saynisyada Dhulka iyo Samada

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda wareegyada isku xidhan ee kawnka, habka qorraxda iyo dhulka.*

- Fahan in cirku leeyahay xiddigo ka badan inta qofka bini'aadanka ahi tirin karo.
- Sharax sida qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha aad moodid in dhamaantood ay si tartiib ah cirka u maraan.
- Sharax sida dayaxa aad u moodid inuu maalin kasta intii hore wax yar ka duwan yahay, laakiin haddana uu isla sidii hore oo kala u muuqo afar toddobaad kasta.
- U fiirso in isbeddelada cimilada qaarkood ay dhacaan inta lagu jiro maalintii halka kuwo kale ay dhacaan xilliyada qaarkood.

Fiiri fahamkaaga: ***Isbeddelada ku Dhaca Cimilada***

Isbeddelada ku dhaca cimilada maalintii waxa ku jira kara roob, ceeryaan, baraf iyo roob is wata ama roob dhagaxyaale. Isbeddelada kale ee ku dhaca cimilada waxay dhacaan xilliyada qaarkood sida barafka oo dhaca jiilaalkii iyo kulayka oo dhaca xagaagii.

- Sharax xilliga adiga oo cabbiraya heerkulka iyo biyo da'a (tusaale ahaan, roob, baraf).

Saynisyada Nolosha

Taa macnaheedu waa: *Fahmidda hab dhiska iyo shaqeynta hababka iyo sida ay ula falgalaan degaanka.*

- Fahan in dadka iyo xayawaanku u baahan yihiin hawo, cunto, biyo, goob noolaansho iyo hoy isla markaana in dhirtu u baahan tahay hawo, biyo, nafaqo (tusaale ahaan, macdanaha), goob noolaansho iyo iftiin si ay u noolaadaan.
- Fahan inay jiraan noocyo kala duwan oo ah degaano oo taageera (quudiya) noocyo kala duwan oo ah nooleyaal.

- Garo oo isbar-bardhig waxyaabo saddex-cabbirle ah (tusaale ahaan, saddex-jibaareyaal, toobino, biramidyo, dhululubooyin) taasoo ku saleysan astaamahooda sida qaabka wajiyada ama oogada ama tirada cidhifyada.
- Saadaali qaabyada cusub ee sameysmi doona marka la isku daro qaabab ama marka qaab la kala qaado ama la kala jaro.
- Garo oo abuur qaabab leh xariiq sinaan.

Fiiri fahamkaaga: ***Xariiq Sinaan***

Qaab leh xariiq sinaan waa la isku laabi karaa ka dibna si sax ah ayaa labadiisa badh isku leekaanayaan. Tusaale ahaan, caleemo badan, xuruufta M iyo H, iyo qaababka qaarkood sida ♡□⬡ waxay leeyihiin xariiq sinaan.

- Go'aan ka gaadh in qaabab laba-cabbirle ahi ay isku sargo'an yihiin (qaab iyo cabbir isku mid ah) ama isu eeg yihiin (isku qaab, laakiin cabbir kala duwan) adiga oo mid midka kale dul saaraya.

Saansaan, Fansaar iyo Aljebra

Taa macnaheedu waa: *Matalidda saansaamo iyo xidhiidho adiga oo isticmaalaya shaxano, garaafyo iyo astaamo una isticmaalaya furfuridda mas'alooyin.*

- Sii fidi saansaamaha tiro ee fudud.
- Sharax xeerka saansaan isla markaana abuur saansaamo leh xeerar sugan.

Fiiri fahamkaaga: ***Xeerarka Saansaamo***

Saansaan A: 2, 4, 6, 8, 10... **Saansaan B:** 1, 3, 5, 7, 9...
Xeerarka Saansaamo A iyo B: Ku dar 2

- Fahan oo isticmaal isu-dhigga si aad u garatid qiimaha ay leeyihiin astaamo matalaya tirooyin aan la aqoonin.

Fiiri fahamkaaga: ***Isu-dhig***

□ + ○ = 10

Qor qiimaha kala □ duwan ○ ee sameyn doona isku-darka 10.

(Δ) - 2 = 4
Qor qiimaha (Δ) ee weedha tiro ka dhigaya run.

- Sharax isbeddelada tayo (isticmaal ereyo sharaxaad leh) iyo isbeddelada tiro (sheegaya inta tiro le'eg tahay adiga oo isticmalaya tiro ama cabbir), ee gaar ahaan loo isticmaalo mas'alooyinka isku-daridda iyo ka-jaridda.

Fiiri fahamkaaga: ***Isbeddelada Tayo iyo Isbeddelada Tiro***

Isbeddel tayo: Ardaygu wuu sii dheeraaday sannadkan.
Isbeddel tiro: Ardaygu waxa uu koray 2 inji sannadkan.

Qeexidda Xogta iyo Itimaalka

Taa macnaheedu waa: *Habeynta iyo ka-tarjumidda natiijooyinka iyada oo la isticmaalayo ururin xog si looga jawaabo su'aalo, loo muujiyo xidhiidh loona sameeyo saadaalin.*

- Ururi xogta adiga oo su'aalo weydiinaya, u fiirsanaya ama sameynaya tiro-koob ka dibna xogta ka dhigaya shaxan, garaaf sawir ah ama garaaf ulo ah.
- Qor dhawr weedho si aad u sharaxdid ugana jawaabtid su'aalo ku saabsan xogta lagu muujiyay shaxanka ama garaafka.
- Samee xariiq wakhti si aad dhacdooyin nidaam isugu xejisid.
- Fahan in xogtu ay kala duwanaan karto marka la eego dadweyne kala duwan (tusaale ahaan, bandhigyada telefishanka ee ardaydu jecel yihiin iyo kuwa waalidku jecel yihiin).
- Qor natiijooyin fudud oo suurogal ah oo ka soo baxay tijaabo fudud isla markaana saadaali in natiijooyinka suurogalka ahi ay yihiin kuwo ay u badan tahay inay dhacaan, kuwo aanay u badnayn inay dhacaan ama kuwo si siman laga yaabo inay u dhici karaan.

Hababka Xisaabta

Taa macnaheedu waa: *Dabiqidda farsamooyinka xalinta mas'alooyinka iyo caqli-keenista iyo gudbinta fikradaha xisaabta.*

- Garo oo dib ugu sheeg ereyo aad adigu leedahay su'aasha ama dhibaatada iyo warka loo baahan yahay si loo xaliyo dhibaatada.

- Qiimee caqli-galka saadaalinta, qiyaasta iyo xalka.
- Gudbi fikirka iyo xalka adiga oo isticmaalaya hadal caadi ah iyo hadalka astaamaha xisaabta ee habboon.

Talooyin iyo Wax-qabad

- Weydii ilmahaaga inuu isticmaalo tirooyin si uu u helo natiijooyin kala duwan oo badan intii suurogal ah. Tusaale ahaan, isticmaal kaadhadh ah laba-labo, iyo saddex-saddex si aad u heshid isku-dar iyo faraq (7 - 6 = 1; 7 + 2 - 6 = 3; 6 - 2 = 4; 7 - 2 = 5; 6 + 2 = 8; 7 + 2 = 9, iwm.)
- Ku tababaro tirinta lacag iyo sameynta isbeddel. Tusaale ahaan, weydii ilmahaagu su'aalo ay ka mid yihiin: "Waxa aan jeebka ku haystaa lacag dhuruuruq ah oo marka la isku daro ah 90 senti. Maxay kala yihiin isku-darka noocyada dhuruuqaqa ku jiri kara jeebkayga?" Ku tababaro qorista qiimaha lacagta adiga oo isticmaalaya calaamadda (¢) iyo qaab bar tobanley adiga oo isticmaala calaamadda doolarka ($).
- Dukaan cunto ayaa waxa ka buuxa qaabab joomatari. Weydii ilmahaaga inuu helo shay wajiyadiisu yihiin goobooyin, shay u sameysan qaab toobin, ama qaabab si fiican isu dul fuuli kara ama la isku raseyn karo iyo kuwo qaadanaya meel weyn.
- Ku tababaro cabbirista walxo adiga oo isticmaalaya qalabka yaala guriga. Soo saar masdarad, ul ama miisaan ka dibna weydii ilmahaaga inuu cabbiro ama miisaamo wax isaga oo isticmaalaya qalabka saxda ah.
- Weydii ilmahaagu inuu sawirro xariiq wakhti oo dhacdooyinka maalintiisa si nidaam ah isugu xejinaysa.
- Sawirro ah cuntooyin dhan sida saanwij dhan, doolshe/keeg iyo biitsa, ka soo goo majalad. Ilmahaaga weydii inuu sawirada u kala jaro kala badh, hal-saddexaadyo iyo hal-afraadyo.